U.S. Department of Justice Community Relations Service
(Adeegga Xariirka Bulshada ee Waaxda Cadaalada Maraykanka)

# Ayaa la shaqayn doona Bulshooyinka Jaamacada iyo Kuleejka

## si Looga Hortago loogana jawaabo Dhacdooyinka Danbiyada ku salaysan Nacaybka iyo Eexda

Nabad Ilaaliyaha Maraykanka, United States Department of Justice (DOJ, Waaxda Adeegga Cadaalada ee maraykanka) Community Relations Service (CRS, Adeegyada Xariirka Bulshada) ayaa bixinaysa fududayn, dhex-dhexaadin, tababar, iyo adeegyada dib u heshiisiinta oo loo fidinaayo bulshooyinka ay colaaduhu ka jiraan korna loogu qaadaayo awoodooda si ay qaab madax banaan uga hortagaan una xaliyaan rabshada imaan kara mustaqbalka.

Sida ku cad Title X ee Sharciga Xaquuqda Aadanaha oo soo baxay 1964 iyo Sharciga Kahortaga Danbiyada Nacaybka Ku salaysan ee Matthew Shepard iyo James Byrd, Jr., oo soo baxay 2009, CRS ayaa siiya taageero dugsiyada sare ee dawlada iyo kuwa gaarka loo leeyahay, jaamacadaha iyo kuleejyada waajahaaya rabshad ama qalalaase jira ama laga cabsanaayo oo ku salaysan isirka, midabka, asalka, jinsiga, aqoonsiga jinsiga, dookha galmada, diinta, ama naafada dhabta ah ama laga shakisan yahay. CRS ayaa ah qolada sadexaad ee dhex-dhexaadka ah adeegyadiisuna waa kuwo qarsoodi ah, ikhtiyaari ah, waxaana lagu helayaa lacag la'aan.

Sida ay sheegtay Laanta Danbi Baarista Federaalka (Federal Bureau of Investigation (FBI), danbiga ku salaysan nacaybka ee federaalku waa "fal danbiyeed ka dhan ah qof ama hanti kaasoo salka ku haya fikirka khaldan ee danbiiluhu ka qabo si guud ama qayb ahaan isir, din, naafo, dookh galmo, qoomiyad, jinsi, ama aqoonsiga jinsiga."



Getty Images/Ariel Skelley

**Barnaamijyada iyo adeegyada CRS waxaa kamid ah**

**Wada hadal la Dhex-dhexaadinaayo**
CRS ayaa fududaysa kulanno dhex mara saraakiisha jaamacada, booliiska xarunta, hogaamiyaasha ardayda, iyo saamileeyda kale ee muhiimka ah si loo furo wadooyinka wada hadalka korna loogu qaado xal u helida kiisaska lagu eedeeyay danbiyada nacaybka ku salaysan ee salka ku haya fikradaha khaldan. Mawduucyada sida joogtada ah looga dodo waxaa ku jira xeerarka booliiska xarunta jaamacada si ay uga jawaabaan dhacdooyinka ku salaysan fikirka khaldan iyo eedaymaha danbiyada nacaybka ku salaysan, qeexida siyaasaadka xarunta jaamacada uga degsan mudaaharaadyada iyo banaanbaxyada, iyo sidoo kale arimaha kale ee muhiimka u ah bulshada xarunta.

**Shirarka Dhacdooyinka ku salaysan Fikradaha khaldan iyo Danbiyada Isir Nacaybka** Shirkaan nus maalinka soconaaya ayaa siinaaya xubnaha bulshada jaamacada iyo kuleejka iyo booliiska xarunta jaamacada xog la xariirta Sharciga Kahortaga Danbiyada Nacaybka ku salaysan ee Matthew Shepard iyo James Byrd, Jr.. Barnaamijku wuxuu la shaqeeyaa booliiska federaalka, qareennada degmada, saraakiisha jaamacada iyo kuleejka, hogaamiyaasha ardayda, booliiska xarunta iyo kuwa deegaanka, hogaamiyaasha diinta, iyo ururada u dooda bulshada si ay uga qaybgalaan dodo iyo xog isdhaafsi ku aadan qaababka loola dagaalamaayo loogana hortagaayo danbiyada nacaybka ku dhisan ee ka dhaca jaamacadaha.

**Shirka Difaacida Goobaha Cibaadada**
Shirkaan soconaaya nus maalinka ayaa kulminaaya khubaro siinaaya hogaamiyaasha diinta iyo jamaacaadka ku sugan xarunta kuleejka iyo jaamacada xog ku saabsan danbiyada nacaybka ee salka ku haya

fikradaha khaldan ee laga haysto diinta; qiimaynada khatarta ee booliiska maxaliga ah, kuwa gobalka, iyo federaalka; iyo talaabooyinka lagu difaacaayo goobaha cibaadada iyo xarumaha diinta ee ku yaala xarunta jaamacada lagana difaaco danbiyada nacaybka iyo khataraha kale ee rabshada. Barnaamijku wuxuu dhiiri gelinayaa dhaqan gelinta barnaamijka amaanka, wuxuu bixinayaa hanaannada ugu fiican ee amaanka, wuxuu kobcinayaa iskuxirka iyo wacyi gelinta bulshada, wuxuuna bixinayaa khayraad, sida tusaaleyaasha qorsheyaasha amaanka iyo khayraadka xarunta.

**Aqoonsiga Dhibaatada Xarunta iyo Arumaha Xal raadinta wadajirka ah (Campus-SPIRIT)** Barnaamijkaan soconaaya sideeda saacadood wuxuu isku keenayaa hogaamiyaasha kaladuwan ee ardayda, maamuleyaasha xarunta, xubnaha kuliyada, shaqaalaha, booliiska jaamacada, iyo hogaamiyaasha kabaxsan jaamacada ee bulshada si loo aqoonsado xalna loogu helo arimaha adag ee saamaynta ku leh bulshooyinka jaamacada. Barnaamijka waxaa fududaynaaya adeega CRS iyo abaabuleyaal mutadawiciin maxali ah wuxuuna ka caawinayaa jaamacadaha iyo kuleejyada inay abuuraan ayna dhaqan gashaan xalal adag oo lagu xalinaayo dhibaatooyinka, sida abuurista qorsheyaasha talaabada kahortaga iyo gurmadka danbiyada nacaybka ku salaysan iyo kooxaha shaqada.


**Tababarka Wacyi-gelinta Bulshada** CRS waxay tababaro siisaa booliiska xarunta si loo baro farsamooyinka bulshada iyo xeeladaha isku xirka iyo la hadlida bulshada si loo adkeeyo xariirada u dhexeeya booliiska xarunta ama bulshada jaamacada iyo kuleejka ee ay u adeegaan. Tababaradaan waxaa ku jira La hadlida iyo Iskaashiyo lala sameeyo Qoomiyadaha Ameerikaanka ah ee Sikh, La hadlida iyo Iskaashiyo lala sameeyo Ameerikaanka Muslimiinta ah, iyo La hadlida iyo xariiro lala sameeyo Bulshooyinka Nimoow-naaga ah.

**Dhex-dhexaadin** CRS ayaa bixisa adeegyada dhex-dhexaadinta si looga caawiyo bulshooyinka jaamacada iyo kuleejka xal u helida dagaallada iyo iskudhacyada ayadoo la adeegsanaayo wada-hadallo fool-ka-fool ah oo u dhexeeya hogaamiyaasha. Yoolka dhex-dhexaadintu waa in la abuuro heshiisyo qoran oo u dhexeeya dhinacyada kaasoo kordhinaaya kalsoonida, kor u qaadaya xariirada bulshada, dhisayana tayada xarunta jaamacada ama kuleejka.

**Talo bixin** CRS wuxuu baxshaa adeegyada talo bixinta si looga caawiyo bulshooyinka jaamacada iyo kuleejka inay si wanaagsan uga falceliyaan rabshadaha. Adeegyadaan waxaa ku jira caawimaad farsamo oo ku aadan abuurista gudiyada sinaanta iyo kaladuwanaanta dadka ama kooxaha shaqada jawiga xarunta; farsamooyinka ugu fiican ee lagula hadli karo bulshooyinka kaladuwan; iyo talo bixin ku aadan ciladaha wadahadalka, xalinta khilaafka, iyo raadinta xal wadajir ah.

## Meesha aan ka Shaqayno

- New England
- Waqooyi-bari
- Atlantiga-Dhexe
- Koonfur-bari
- Galbeedka-dhexe
- Koonfur-galbeed
- Dhexda
- Buuralayda
- Galbeedka
- Waqooyi-galbeed
- Saraakiisha Goobta Shaqada
- Saraakiisha Gobalka
- Xafiiska CRS ee Goobaha Shaqada




## Hel adeegeena, nagu xirnoow

**www.justice.gov/crs** **www.justice.gov/hatecrimes**

facebook.com/DOJCRS/ @DOJ_CRS askcrs@usdoj.gov 202.305.2935

Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijkaan ama adeegyada kale ee CRS, fadlan la xariir xafiiska CRS ee deegaankaaga:

https://www.justice.gov/crs/about-crs/regional-and-field-offices